# Magangalyada Ireland:

## Hage Loogu Talagalay Da'yarta



# MACLUUMAAD SHAQSIYEED MUHIIM AH

Magaca: ..............................................................................................................

Macluumaadka xiriirtanka: ..........................................................................................

Lambarka tixraaca codsiga magangalyada: ..........................................................

Magaca shaqaale bulsheedka Tusla iyo macluumaadka xiriirtanka: ..........

..............................................................................................................................

Magaca looyarka iyo macluumaadka xiriirtanka: ................................................

..............................................................................................................................

Lambarka PPS: ..........................................................................................................

Xusuus-qorkayga shakhsi ahaaneed: ......................................................................

..............................................................................................................................

..............................................................................................................................

..............................................................................................................................

..............................................................................................................................

# Tusmada




1. Arrimaha ku saabsan hagahan ..... 7
2. Maxay tahay macnaha in la codsado magangalyo? ..... 9
3. Kahor codsashada magangalyada ..... 15
4. Habsocodka magangelyada gudaha Ireland ..... 19
5. Nidaamka IPO ..... 23
6. Go'aanka IPO ..... 33
7. Rafcaanka IPAT ..... 35
8. Macluumaad kale ..... 43
9. Xuquuqdaada ..... 47
10. Ururrada kale ..... 51

# 1.

# Arrimaha ku saabsan hagahan

# Hagahan waxa loogu talagalay carruurta iyo da'yarta aan lala socon ee magangalyada ka codsanaysa Ireland.

Waxay sharraxaysaa tallaabooyinka kala duwan ee habraaca magangalyada.[1] Ereyada qaarkood ayaa ku leh macne gaar habraaca magangalyada sidaa daraadeed aynu marka hore u fiirsanno ereyada 'carruurta aan lala socon'. **Carruurta aan lala socon ayaa carruur aanay la socon waalidkood ama qof kasta oo kale oo mas'uul ka ah daryeelkooda iyo badbaadintooda, sida mas'uul oo kale ah.**[2]

Si aad u ogaato habraaca guud ee magangalyada daawo filinkayga sawir gacameedka (animation) ee laga helo **www.unhcr.org**




Marka lagu gudojiro dhammaan hagahan Cali ayaa kuu sheegi doona waxyaabihii uu kala soo kulmay habraaca magangalyada ahaan da'yar aan lala socon.

1. Afeef: Hagahan ayaa loogu talagalay kaliya arrimo la xiriira macluumaad bixin, loomana arki karo inuu yahay talo la xiriirta dhinaca sharciga oo waxaana suurtagal ah in wax laga beddalo.
2. Ilmo markay tahay sharciga Irish-ka waxa lagu qeexaa qof da'diisu ka yar tahay 18 sano. Ereyada 'da' yarta' marka lagu isticmaalayoo hagahan macnaheedu waa tobaneeyo-jireyaal da'doodu ka yar tahay 18 jir.

# 2.

# Maxay tahay macnaha in la codsado magangalyo?

# Markaad magangalyo ka codsaneyso gudaha Ireland, macnaheedu waa inaad weyddiisaneyso Dowladda Ireland magan badabado u noqoto maadama aad ka baqayso inaad ku noqoto dalkaagii hooyo.

'Magangalyada' waxa mararka qaarkood loo yaqaan 'Badbaadin Caalami'. **Habraaca magangalyada ayaa ah nidaam ay Dowladda Ireland ay ku eegeyso sababta aadan ugu noqon karin dalkaagii hooyo iyo sababta aad uga baahan tahay magangelyo Ireland.**

Dalka Ireland, waxa jira laba nooc oo ah ka badbaadin waxyeellada gudaha dalkaaga hooyo:

1. **Heer qaxootinimo**
2. **Badbaadin hoosaadka**

Markaad codsato magangalyo, Dowladda Ireland ayaa u fiirsan doonta haddii aad u baahan tahay heer qaxootinimo ama badbaadin hoosaad. Waxa kale oo ay eegi doontaa haddii ay jiraan sababo kale oo ay tahay inaad u joogto gudaha Ireland. Taas waxa loo yaqaan oggalaansho joogitaan. Sharciga ugu wayn ee badbaadinta caalamiga ah ee Ireland ayaa ah **Sharciga Badbaadinta Caalamiga ee 2015.**

# Ayaa qaxooti ah?

**Qaxooti waa qof aan ku noqon karin dalkiisii ama dalkeedii hooyo sababo ka cabsi cadaadin awgeed oo ku lug leh mid ama in ka badan sababaha soo socda, oo ah:**

- **fikradahooda siyaasadeed**
- **diintooda**
- **jinsiyaddooda**
- **qowmiyaddooda**
- **xubinnimada 'koox bulsheed gaar ah'**, si kale haddii loo dhigo ah koox dad ah oo wadaaga waxyna beddali karin. Sababahan sifooyinka la wadaagga ah waxaa loo arkaa inay yihiin koox gaar ah bulshadooda oo waxaana laga yaabaa inay halis ugu jiraan sidaa daraaddeed. Tusaalooyinka sifooyinka laga yaabo inay dhaliyaan kooxo bulsheed oo gaar ah waxa ka mid ah jandarka, doorbidka jinsiga iyo/ama haddii u qof waa hore u ka tirsanaa koox qeexan, sida ahaan askari hore.

Sababahaas ayaa walibana laga yaabaa inay ahaadaan kuwo ku salaysan fikradaha siyaasadeed, diinta, jinsiga, qowmiyad xubin ka ahaanta ama xubin ka ahaanta urur bulsheed gaar ah ee xubin qoyskaaga ka mid ah. Cadaadisku waa erey sharciyeed ay ka mid noqon karaan waxyaabo badan sida si-xun-ula-dhaqanka, wax-yeellidda ama qaababka kale ee waxyeellada ah. Looyarkaaga ayaa kuu sharraxi kara macnaha cadaadinta.



# Maxay tahay macnaha badbaadin hoosaadku?

Dadka aan la siinin aqoonsi heer qaxootinimo waxa la siin karaa badbaadin hoosaad. **Badbaadin hoosaadka ayaa la siiyaa dadka u yeelan doona halis daran haddii ay ku noqdaan dalkooda hooyo.** Tusaalooyinka ka midka ah waxyeellada halista ah waa:

- **ku xukunka dilka**
- **ciqaabta**
- **ula dhaqanka si bini-aadinimada ka baxsan ama hoos-u-dhigid**
- **halis daran oo ku soo food yeelata noloshaada haddii ay dhacaan colaado hubaysan**

Ereyadan ayaa ah kuwo isku murgsan laakiin waxa kaa caawin kara **qareenkaaga** sharraxaadda ereyadan iyo siday u saamayn karaan codsigaaga.

Xaaladaha qaarkood, waxa laga yaabaa inaad ka baqayso cadaadis ama waxyeelo halis ah inay kugu yimaaddiin gudaha dalkaaga hooyo sababo dhacay kaddib markaad ka timid. Si magangalyo laguu siiyo kaliya uun ma ah inaad ku silicday cadaadis ama waxyeelo halis kugu qabsatay dalkaagii hooyo. Hase yeeshe, haddii adiga ama qof kuu dhow aad silic kala kulanteen cadaadis ama waxyeelo halis ah wakhti la soo dhaafay, waa inaad u sheegtaa adeegahaaga bulsheed iyo looyarkaaga maadaama ay taasi tahay arrin aad muhiim ugu ah marka loo fiirsanayo sababta aad ugu baahan tahay magangelyada gudaha Ireland.

# Waa maxay macnaha u oggolaanshaha joogitaanku?

**U oggolaanshaha joogitaanka ayaa ah u oggolaansho laanta socdaalku ay kuugu oggolaanayso inaad joogto oo ku noolaato Ireland xitaa haddii aadan u baahnayn u aqoonsi heer qaxootinimo ama badbaadin hoosaad.** Waxa jira dhowr sababood oo laguugu oggolaan karo joogitaanka, oo ay ka mid yihiin duruufahaaga qoys ama shakhsiyeed. Marka la gaarayo go'aanka oggolaanshaha joogitaanka Wasiirka Caddaaladda iyo Sinnaanta ayaa u fiirsan doona:

- intay ahayd dhererkeedu muddada aad joogtay Ireland iyo xiriirrada muhiimka ah ee aad halkan ku haysato
- sababo bani-aadamnimo, oo ay ka mid yihiin sababo caafimaad daran
- sida aad ugu dhaqantay gudaha Ireland iyo dalal kale, oo ay ka mid yihiin haddii lagugu helay danbi
- sababo kasta oo kale oo muhiim ah.

Haddii aad hayso midkoodna macluumaad aad u maleyneyso inuu kaa caawin karo codsigaaga u oggolaanshaha joogitaanka u sheeg shaqaale bulsheedkaaga iyo looyarkaaga.

**Tusaale ahaan, xaaladdaada shaqsiyeed ayaa isbeddali karta inta lagu jiro habsocodka magangalyada, oo waxa dhici karta inaad hesho shaqo waqti-dhiman ah ama aad dhammaystirato koorso waxbarasho korodhsi ah markaa hubi inaad u sheegto isbeddelladan shaqaale bulsheedkaaga iyo looyarkgaaga.**

# Maxay tahay xuquuqdaydu inta lagu jiro habsocodka magangalyada?

Waxaad leedahay dhammaan xuquuqda dadka qaangaarka ee ku jira habsocodka magangalyada ay leeyihiin laakiin waxaad leedahay xuquuq dheeraad ah, oo ay ka mid yihiin:

- **Xaqa aad u leedahay in danahaaga ugu fiican arrinta loo tixgaliyo:** tani macnaheedu waa in dhammaan tallaabooyinka iyo go'aammada adiga ku saameynaya ay yihiin kuwo ku saleysnaadaan waxa adiga kuu fiican.

- **Xaqa aad u leedahay in lagu dhagaysto:** tani macnaheedu waa marka dadka qaangaarka ahi ay go'aaminayaan go'aanka adiga ku saamaynaya, waxaad si xor ah u sheegan kartaa waxaad adigu isleedahay wey tahay inay qabsoomaan oo fikraddaadana waa in la tixgaliyaa.



# 3.

# Kahor codsashada magangalyada

# Waxaad tahay ilmo aan lala socon haddii aad ka yar tahay d'ada 18 sano, oo aad dibadda ka joogto dalkaaga hooyo oo aad joogto Ireland adiga oo aanay kula joogin waalid ama mas'uul.

Markaad tahay ilmo aan lala socon gudaha Ireland, waxa laguu gudbin doonaa kooxda Carruurta Lumay ee Magangalyo Doonka ah gudaha **Tusla – Hay'adda Carruurta iyo Qoyska**. Kooxdaas ayaa mas'uul ka noqon doonta daryeelkaaga inta aad tahay d'a ka yar 18 sano gudaha Ireland.




"Waxay igu kalliftay inaan ka cararo dalkaygii hooyo sababo dagaal awgood.

**Intaan ku jirnay socdaalkii dhibka lahaa ayaan kala lunnay qoyskaygii. Markaan imid Ireland waxaan ahaa aniga keliyday."**

Marka laguu soo gudbiyo Tusla, waxaa lagugu hagaajin doonaa **shaqaale bulsheed** eegi doona inay ka codsiga magangalyada Ireland ay tahay iyo in kale dantaada ugu fiican.

“Anigu waxaan ahay shaqaale bulsheed. Waxaan ka caawiyaa da’yarta waxyaabaha ay u baahan yihiin oo dhan.

Waxyaabahan baahida ah waxa ka mid noqon kara meesha ay ku noolaan doonaan oo ay u aadi doonaan dugsiga, iyo haddii ay suurtagal tahay, xitaa in lala xiriiro qoysaskooda. Aniga oo kala kaashada qofka da’yarta ah ayaan anigu u soo saaraa qorshe daryeel oo salka ku haya isaga ama iyada baahidooda iyo waxa danahooda ugu fiicani tahay. Iyadoo oo qayb ka ah qorshahaas daryeelka ah ayaan mararka qaarkood ku heshiinnaa in qofka da’yarta ahi uu codsado magangalyo. Caadi ahaan waxaan ka helnaa caawimo looyar inaan go’aansanno arrintaas.”



Haddii adeegahaaga bulsheed u go'aamiyo inaad codsato magangalyo, isaga ama iyada ayaa la xiriiri doona **Legal Aid Board (Guddiga Gargaarka Sharciga)** si ay kuugu qabtaan looyar adiga kula shaqeeyaa. Looyarkan ayaa ku siin doona talo sharci oo ku caawin doona inta lagu jiro habsocda.



**Kaalinta looyarkaaga:** looyarkaaga ayaa kaa caawin doona codsigaaga magangalyada. Isaga ama iyada ayaa kaa caawin doona inaad ogaatid sababta aad ugu baahan tahay magangalyo dalka Ireland dhexdiisa. Waa muhiim inaad kala hadasho isaga ama iyada dhammaan waxyaabaha aad baqdinta ka qabto. Haddii aad wax dhibaato ah in kasta ha noqotee aad kala kulanto looyarkaaga waxaad la hadli kartaa adeegahaaga bulsheed.

## Muhiim

**Raadraaca Qoyska:** waxa laga yaabaa in aadan garanayn meesha ay qoyskaagu joogaan laakiin waxaad la xiriiri kartaa Irish Red Cross (Qaybta Soo Celinta Xiriirinta Qoyska) oo ay dhici karto inay kaa caawiyaan soo helitaanka qoyskaaga. Nidaamkan raadraaca qoyska ayaa dhici karta marxalad kasta oo ka mid ah habsocodka magangalyada ama wakhti ka horeba ah. Tusla ayaa kaa caawin doonta inaad raadraacdid qoyskaaga haddii ay tani ku jirto danahaaga ugu wanaagsan; tani waxay qayb ka noqon kartaa qorshahaaga daryeelka.

Haddii aad si kastaba ha ahaate ula xiriirto qoyskaaga inta lagu jiro habsocodka magangalyada waa inaad u sheegtaa adeegahaaga bulsheed.

# 4.

# Habsocodka magangelyada gudaha Ireland

# Ayaa go'aan ka gaara codsiyada magangalyada?

Waxaa jira 2 xafiis oo ku yaal Ireland oo eegi kara haddii aad u baahan tahay magangalyo iyo in kale:

- **The International Protection Office (IPO):** xafiiskan ayaa eegi doona codsigaaga magangalyada. Si aad arrimaha wax uga ogaato in intaa ka badan fadlan aad: **www.ipo.gov.ie**

- **The International Protection Appeals Tribunal (IPAT):** haddii IPO ay go'aamiso in aadan u baahnayn magangalyo markaas waxaad racfaan uga qaadan kartaa go'aankaas Maxkamadan. Si aad arrimaha wax uga ogaato in intaa ka badan fadlan aad: **www.protectionappeals.ie**



**Dulmarka guud ee habsocodka magangalyada:**

**1. CODSIGA MAGANGALYADA**

Markay hore waxa laguu gudbbin doonaa Tusla. Shaqaalahaaga bulsheed ayaa dhici karta inuu kaa caawiyo inaad samayso codsi magangalyo haddii ay u maleynayaan inay taasi tahay waxa adiga wanaagga ugu badan kuu leh. Waxa kale oo aad codsan kartaa looyar wakhtigan.

↓

**2. WARAYSIGA GAABAN**

Waxaa lagaa qaadi doonaa waraysi gaaban markaad tagto xafiiska IPO si aad magangalyo u weyddiisato.

↓

**3. SU'AALO JAWAABO XULASHO LEH**

Xafiiska IPO ayaa ku siin doona su'aalo jawaabo xulasho leh. Su'aaluhu waxay ku weyddiinayaan macluumaadka adiga kugu saabsan. Shaqaalahaaga bulsheed iyo/ama looyarkaaga ayaa kaa siin doona talo waxa ku saabsan arrintaas.

↓

**4. WARAYSIGA DHEER**

Kani waa wareysigaaga ugu muhiimsan ee IPO oo halkaas lagugu weyddiin doono su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan codsigaaga magangalyda. Shaqaalahaaga bulsheed ayaa ka qaybgali doona wareysigan adiga lagula yeelanayo.

**5. GO'AANKA**

**Waraysiga kaddib, xafiiska IPO ayaa go'aamin doona inaad u baahan tahay magangalyo iyo in kale. Haddii u xafiiska IPO go'aamiyo inaad u baahan tahay magangalyo, waxa laguu oggolaan doonaa inaad joogto Ireland, oo yeelan doontaa qaarkood xuquuqo iyo mudnaano. Eeg bogga 47 ee hagahan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda iyo mudnaanta.**

**6. RACFAANKA**

Haddii u xafiiska IPO go'aamiyo inaadan magangalyo u baahnayn, shaqaalahaaga bulsheed iyo/ama looyarkaaga ayaa kaala hadli doona inaad rafcaan ugu qaadato go'aanka maxkamadda IPAT.

↓


**7. DHAGAYSIGA RACFAANKA**

Haddii aad rafcaan qaato, shaqaalshaaga bulsheed iyo looyarkaaga ayaa kuu raaci doona dhegaysiga rafcaanka ee maxkamadda IPAT.

↓

**8. GO'AANKA MAXKAMADDA IPAT**

Dhagaysiga kaddib, maxkamadda IPAT ayaa go'aan ka gaari doonta haddii u xafiiska IPO u qaaday iyo in kale go'aan qumman. Haddii ay maxkamadd IPAT go'aamiso inaad u baahan tahay magangaalyo, waxa laguu oggolaan doonaa inaad joogto Ireland oo waxaad yeelan doontaa qaarkood xuquuq iyo waxyaabo u mudnaanta. Eeg bogga 47 ee hagahan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda iyo mudnaanta. Haddii ay maxkamadda IPAT raacdo go'aanka xafiiska IPO innaadan magangalyo u baahnayn ah, shaqaalahaaga bulsheed iyo/ama looyarkaaga ayaa kaala hadli doona waxaad ku kici doonto marka xiga.



# 5.

# Nidaamka IPO

# Aan haddaba si fiican ugu fiirsanno tallaabo kasta oo habsocodka ah:

## WARAYSIGA GAABAN

Shaqaalahaaga bulsheed ayaa kuu raaci doona xafiiska IPO ee ku yaal Dublin, oo halkaas aad ka codsan karto magangalyada. Sarkaal IPO ayaa kula yeelan doona wareysi gaaban adiga iyo shaqaalahaaga bulsheed. **Waraysigan waxa adiga lagu weyddiin doonaa su'aalo ku saabsan aqoonsigaaga, aqoonsiga waalidiintaada, dalkaaga hooyo, jidkaad u soo martay Ireland iyo sababaha aad u codsanaysid magangalyada.** Haddii aad ka wayn tahay da'da 14 sano, sawirkaaga iyo farahaaga ayaa walibana lagaa qaadi doonaa si ay xafiiska IPO u xaqiijiyaan aqoonsigaaga iyo inaad ka codsatay magangalyo dal kale oo ku jira Midowga Yurub (EU). Waxa kale oo lagu soo saari doonaa kaar IPO iyo lambar tixraac loogu talagalay codsigaaga oo ah inaad had iyo jeer haysato.

## SU'AALO JAWAABO XULASHO LEH

Xafiiska IPO ayaa ku weyddiisan doona inaad buuxiso foom su'aalo ah oo aad dib ugu soo dirto xafiiska IPO. Su'aalahani waxay ku weyddiin doonaan su'aalo faahfaahin ka sii badan u baahan **oo ku saabsan adiga iyo codsigaaga magangalyada.** Shaqaalahaaga bulsheed iyo looyarkaaga ayaa kaa siin doona talooyin ku saabsan sida loo buuxiyo su'aalaha. Su'aalaha la soo buuxiyay ayaa ka caawinaya sarkaalka IPO inuu fahmo sababaha aad uga baqanayso inaad ku noqoto dalkaagii hooyo. Waxa kale oo ay ka caawinaysaa inaad u diyaar garowdo waraysigaaga dheer.



## WARAYSIGA DHEER

Xafiiska IPO ayaa u soo diri doonta shaqaalahaaga bulsheed waraaq ay ku taal taariikhda ballanta waraysiga dheer loo qabtay. Waraysigaaga dheer ayaa ah midka ugu muhiimsan ee loogu fiirsanayo inaad u baahan tahay iyo in kale magangalyo Ireland. Marmarka qaarkood waxaa loo yaqaan **waraysigaaga shakhsiyedd ama ugu wayn**. Looyarkaaga iyo shaqaalahaaga bulsheed ayaa kaa caawin doona u diyaargarowga waraysigan. Sarkaalka IPO ee hawsheeda ku jira codsigaaga ayaa horay u soo akhriyay markaa dhammaan waraaqahaaga, oo ay ka mid yihiin su'aalahaaga. Isaga ama iyada ayaa walibana ah inay raadiyaan doona macluumaadka ku saabsan dalkaaga hooyo kahor wareysiga; Macluumaadkan ayaa loo yaqaan **macluumaadka dalka laga soo jeedo** ama COI.

### Ma ugu baahan tahay ama ma doorbidaysaa in turjumaan u kuu joogo waraysigaaga?

Xasuusnow inaad u sheegto shaqaalahaaga bulsheed iyo/ama looyarkaaga maalinta ka horreysa wareysiga.

### Miyay kaaga sii habboon tahay haddii u ku waraysto sarkaal IPO lab ama dheddig ah?

Waxa kale oo laga yaabaa inaad doorbiddo in laguu keeno turjumaan lab ama dheddig ah waraysiga. Xasuusnow inaad u sheegto shaqaalahaaga bulsheed iyo/ama looyarkaaga maalinta ka horreysa wareysiga. Xafiiska IPO ayaa markaa kaddib iskudayi doona inay hubiyaan inuu turjumaanka iyo waraystuhuba yahay qof nin ama dumar ah, iyadoo ku xiran waxaad weyddiisatay.

"Waxaan u baahanahay turjubaan maadaama aanan si fiican ugu hadlin Ingiriisiga.

**Waxa kale oo waliba jira qaybo ka mid ah qisadaysa oo aniga igu adag inaan ka hadlo, oo markaa waxaan u malayn inaan weyddiin doono Esther haddii aan u heli karo warayste iyo turjumaan labaduba yihiin dumar. Taasi waxay iigu habboonayn doontaa si ka sii fiican waraysiga."**



Waraysigani wuxuu badanaa qaataa illaa 2 ama 3 saacadood, laakiin waxa laguu oggolaan doonaa inaad si joogto ah u qaadato biririf mararka qaarkood. **Haddii aad u baahato biririf, waxaad u sheegi kartaa sarkaalka IPO, oo isaga ama iyada ayaa ku siin doona waqtiga aad u baahan tahay.** Waa muhiim inaad noqoto qof daacad ah oo run sheega inta lagu jiro waraysigan, oo aad sida ugu faahfaahinta badan ee aad xusuusan karto aad u sheegto. Sarkaalka IPO ayaa raba inuu maqlo sheekadaada, oo wuxuuna weyddiin doonaa su'aalo kaa caawinaya inaad u sheegto arrinta. Tani waa fursaddaada ugu wayn ee aad ugu sheegayso isaga ama iyada dhammaan sababaha aad ugu baahan tahay magangalyo gudaha Ireland. **Haka cabsan inaad u sheegto sarkaalka IPO wixii kasta ee xun ee aad kala soo kulantay dalkaagii hooyo.** Waxaad ku hadashid waraysiga dhexdiisa **looma gudbbin doono** midkoodna qof ku sugan dalkaaga hooyo.

**Haddii aadan fahmin midkoodna su'aalaha u sarkaalka IPO ku weyddiiyo, ugu sheeg sidaas oo weyddiiso inuu isagu ama iyadu ay kuugu celiyaan ama weedho kale kuugu sheegaan su'aasha.** Sarkaalka Xafiiska IPO ayaa qaadi doona diiwaan qoran waraysiga. Isaga ama iyada ayaa joojin doona waraysiga mararka qaarkood oo dib kuugu akhriyi doona diiwaanka. Sarkaalka ayaa ku weyddiin doona inaad xaqiijiso haddii ay sax tahay.

## Muhiim

**Marka diiwaanka qoran dib laguugu akhriyo waxa muhiim ah inaad si taxaddar leh u dhegaysato. Wax kasta ma sidii aad u sheegtay ayaa loo diiwaangaliyay? Dhammaan macluumaadka ku qoran diiwaanku ma saxbaa? Ma jiraan macluumaad muhiim ah oo laga tagay? U sheeg sarkaalka IPO haddii ay sax tahay ama ayna ahayn. Isaga ama iyada ayaa sixi doona wixii qaladaad ama isdabamarin ah ee ku qoran diiwaanka. Waxa kale oo aad waliba xusuusan kartaa markan waxaad illowday inaad u sheegto hadda kahor. Hadda waa waqtigii aad siin lahayd macluumaadka sarkaalka IPO sababta oo ah waxay noqon kartaa mid waxtar leh marka isaga ama iyadu go'aanka ka gaaraayaan codsigaaga magangalyada. Markaad ku qanacdo inuu diiwaanku sax yahay, waxad saxiixi kartaa. Saxiixaaga ayuu macnahiisu yahay inay wax kasta oo ku qoran boggani sax iyo run yihiin.**

# Sidani waa qolka waraysiga ku yaal xafiiska IPO siduu u eg yahay.

Inta lagu jiro wareysigaaga, qof kastaa wuxuu leeyahay door kala duwan oo qof kastaa waa inuu fadhiistaa meel u gooni ah. Bal si fiican aan ugu fiirsanno doorarka kala duwan ee dadka ku jira qolka waraysigu ay leeyihiin.

## SHAQAALE BULSHEEDKA




TURJUBAANKA
SARKAALKA IPO




Sarkaalka IPO ayaa maamulkeeda leh wareysiga. Isaga ama iyada ayaa ku weyddiin doona su'aalo ku saabsan codsigaaga magangalyada oo aad si taxadar leh u dhagaysan doona wax kasta oo aad u sheegto. Isaga ama iyada ayaa u diiwaangalin doona macluumaadkaas kumbuyuutar ahaan ama qoraal ahaan. Taas waxaa loo yaqaanaa **diiwaanka waraysiga**.







Shaqaalahaaga bulsheed ayaa kuu raaci doona adiga wareysiga. Isaga ama iyada ayaa meesha kuugu jooga taageero ahaan adiga laakiin waxa lagaa filayaa inaad ugu jawaabto su'aalaha adiga oo isticmaala ereyadaada. Dhammaadka waraysiga waxa dhicic karta inuu sarkaalka IPO weydiisto shaqaalahaaga bulsheed haddii ay jiraan wax kiale isagu ama iyadu ay ku biirinayaan arrinta kahor intaan la xirin shirka. Looyarkaaga ayaa walibana tagi kara waraysiga haddii uu isagu ama iyadu ay u maleeyaan in loo baahan yahay.



## TURJUBAANKA

Waxa kale oo meesha kuu joogi kara turjubaan ku caawiya inta lagu jiro waraysiga. Turjumaanka ayaa idin caawin doona, sarkaalka IPO iyo dadka kale ee qolka waraysiga ku jiraa si ay midba midka kale ula hadlaan. Turjumaannada ayaa ku hadla labadaba Ingiriisi iyo luqadda aad ku hadasho. Turjubaanka ayaa u turjumi doona su'aalaha sarkaalka IPO luqaddaada oo waxaad adigu tiraa Ingiriisiga. Isaga ama iyada ayaa door muhiim ah ka qaata sidii lagaaga caawin lahaa adigu inaad gudbiso waxaad sheegeyso oo sidaas darteed waa muhiim in la hubiyo bilowga arrinta haddii ay midba midka kale fahmaayaan.

Xasuusnow inaan turjumaannada loo oggolayn inay dhiibtaan fikradahooda ama beddelaan waxaad u sheegto. Turjumaanku wuxuu u joogaa meesha keliya inuu kaa caawiyo wada hadalka oo markaa isagu ama iyadu wax kaalin ah kuma laha go'aanka.

Turjumaannada looma oggola inay dadka kale u sheegaan arrintaada. Isaga ama iyada ayaa ah inay xafidaan arrimaha waraysiga si asturan markaa haka welwelin sheegidda waxaad uga cabsanayso inaad ugu noqoto dalkaagii hooyo markaad joogto hortooda.

## *Muhiim*

Haddii aadan si fiican u fahmin turjumaanka, waa inaad u sheegtaa sarkaalka IPO ama shaqaalahaaga bulsheed isla markaaba. Taasi **kuma** yeelanayso saamayn xun codsigaaga magangalyada oo wuxuu macnaheedu noqoon karaa kaliya in waraysiga IPO loo beddelay maalin kale iyadoo oo laguu diyaariyo turjumaan aad fahamto.

Waraysigaaga kaddib, sarkaalka IPO ayaa sii baari doona codsigaaga magangalyada. Si taas loo sameeyo, isagu ama iyadu waxay tixgalin doonaan waxyaabaha soo socda:

- **macluumaadka aad ka bixisay wixii kugu dhacay adiga ama kuwa kale adiga kuu dhow waayadii la soo dhaafay**
- **xaaladda guud ee dalkaaga hooyo, oo ay ka mid yihiin waxay akhbaarta dalkaaga hooyo sheegayaan**
- **nasiibka ah inaad halis ugu noqon karto waxyeello ama cadaadis haddii aad dib ugu noqoto waddankaagii hooyo**

Mararka qaar dadka ayaa dib loogu yeeraa inay u yimaaddiin xafiiska IPO waraysi labaad haddii macluumaadka qaarkii u baahan yahay in la kala caddeeyo ama sarkaalka IPO uu qabo wax su'aalo dheeraad ah.



**Waxaad ka akhrisan kartaa arromo dheeraad ah oo ku saabsan habsocodka magangelyada ee loogu talagalay carruurta iyo da'yarta aan lala socon ee Buugyaraha macluumaadka Xafiiska Badbaadinta Caalami ee loogu talagalay Ma-Qaangaarayaasha Aan Lala Socon/ Carruurta Lunsan ee Codsadayaasha u ah Badbaadin Caalami.**

“Woxoogaa toddobaadyo ah kaddib markii aan waraysigeygii dheeraa la yeeshay sarkaalka IPO ayay mar kale ila soo xiriireen si ay waraysi dheeraad ah ay iila yeeshaan.

**Anigu waan ka walwalsanaa laakiin Esther, oo ah shaqaalahayga bulsheed, ayaa niyadda iigu dejisay inay caadi tahay in lagula yeesho waraysi kale. Sarkaalka IPO ayaa si wanaagsan ii soo dhaweeyay oo kaliya rabay inuu hubiyo mar kale qaar ka mid ah macluumaadka ku saabsan codsigeyga.”**



# 6.

# Go'aanka IPO

# Muddo yar kaddib waraysigaaga, shaqaalahaaga bulsheed ayaa ka heli doona go’aan xafiiska IPO.

Go’aankan ayaa ah talobixin oo haddii laguu siiyo aqoonsi heer qaxootinimo ama heer badbaadin hoosaad, waxa laguu soo diri doonaa warqad kale oo rasmi ah oo ka socota Wasiirka Cadaaladda iyo Sinnaanta oo loo yaqaano caddaynta. Fadlan dulqaad arrinta u yeelo, maadaama marmarka qaarkood ay qaadan karto muddo kahor inta aad helayso go’aan kama dambays ah oo ku saabsan codsigaaga magangalyada.

Waxa jira dhowr go’aanno oo kala duwan oo aad heli karto:

- **Siin (go’aan kuu wanaagsan) oo ah u aqoonsi heer qaxootinimo.**
- **Siinta aqoonsiga heerka badbaadin hoosaadka. Haddii lagu siiyo aqoonsiga heerka badbaadin hoosaadka ilaalin waxaad weli racfaan ka qaadan kartaa go’aanka ahaa inaan lagu siin aqoonsi heer qaxootinimo.**
- **Haddii laguu diiido aqoonsiga heerka qaxootinimada iyo badabaadin hoosaadka, Wasiirka ayaa go’aan ka qaadanaya in lagu siin karo oggolaanshaha joogitaanka iyo in kale. Haddii lagu siiyo oggolaanshaha joogitaanka, waxaad wali rafcaan ka qaadan kartaa go’aanka ah inaan lagu siin aqoonsiga heerka qaxootinimada ama badbaadin hoosaadka.**

Looyarkaaga iyo shaqaalahaaga bulsheed ayaa kaala hadli doona waxyaabaha kula gudbboon marka go’aanka laga helo xafiiska IPO.

# 7.


# Rafcaanka IPAT

# Haddii aysan ku siin aqoonsi heer qaxootinimo ama badbaadin hoosaad xafiiska IPO, waxaad racfaan uga qaadan kartaa go'aankaas maxakamadda IPAT.

Haddii u ku siiyo badbaadin hoosaad xafiiska IPO, laakiin aad dareensan atahay inay ahayd in lagu siiyo aqoonsi heer qaxootinimo, waxaad sidoo kale racfaan ka qaadan kartaa go'aankaas. Looyarkaaga iyo shaqaalahaaga bulsheed ayaa kaala hadli doona waxyaabahan kula gudboon haddii ay khuseeyaan keeska.

Maxay ka dhigan tahay in laga qaato racfaan go'aanka xafiiska IPO? **Taas macnaheedu waa inaad aamminsan tahay inuu go'aanka xafiiska IPO uu ahaa qalad oo aad u baahan tahay magangalyo ah dalka Ireland ah.** Maxkamad gaar ah oo madax-bannaan, oo ah maxkamadda IPAT, ayaa markaa dib u eegi doonta go'aanka si loo eego haddii ay sax ahayd ama aysan ahayn.

Markuu looyarkaagu u dhiibo rafcaan ka qaadasho go'aanka xafiiska IPO, waxaa lagu siin doonaa taariikhda ballanta **Dhageysiga racfaanka ee maxkamadda IPAT**. Halkani waa meesha adiga, shaqaalahaaga bulsheed, looyarkaaga iyo sarkaalka IPO aad kula kulmi doontaan Xubinta Maxkamadda ee ka socda IPAT. Looyarkaaga ayaa kuu shaarrixi doona sababta uu isagu ama iyadu ay ugu malaynayaan inuu xafiiska IPO ay samaysay go'aanka qalddan. Xubinta Maxkamadda ayaa ku weyddiin karta su'aalo qaarkood marka la joogo dhagaysiga.




"Markaan ku jiray rafcaanka dhagaysiga ayuu Xubinta Maxkamaddu i weyddiiyay su'aalo la mid ah kuwa sarkaalka IPO. Shaqaalahayga bulsheed iyo looyarkayga ayaa si fiican iigu diyaariyay dhegaysiga oo waan garanayay wixii laga filanayay. Bilowgii habsocodka ayuu Xubinta Maxkamadda Gaarka ahi iigu sharraxay nidaamka dariiq fudud oo la fahmi karo."

# Sidani waa sida u qolka waraysiga ee ku yaal maxkamadd IPAT uu u eg yahay.

Inta lagu jiro rafcaanka, qof kastaa wuxuu leeyahay door kala duwan oo qof kastaa wuxuu fadhiistaa meel u gooni ah. Bal si fiican aan ugu fiirsanno doorarka kala duwan ee dadka ku jira qolka waraysigu ay leeyihiin.




XUBIN IPAT
SARKAALKA IPO EE ARRIMAHA DHIIBAYA




Xubinta Maxkamada Gaarka ah ayaa arrimaha dhageysiga kala wada. Isaga ama iyada ayaa ku weyddiin doona su'aalo ku saabsan codsigaaga magangalyada oo aad si taxadar leh u dhagaysan doona wax kasta oo aad u sheegto. Isaga ama iyada ayaa laga yaabaa inay qaataan waxay u qortaan xusuus inta lagu jiro dhageysiga.





Waxa kale oo meesha kuu joogi kara turjubaan ku caawiya inta lagu jiro rafcaanka. Turjumaanka ayaa idin caawin doona, Xubinta Maxkamadda Gaarka iyo dadka kale ee qolka dhagaysiga ku jiraa si ay midba midka kale ula hadlaan. Sidii xaafiiskii IPO oo kale, kaalinta turjubaanku waa inuu turjumo wax kasta oo adigu aad dhahdaa, Xubinta Maxkamadda Gaarka iyo dadka kale ee qolka dhegeysiga ku dhaheen. Waa inaad hubisaa inaad adigu fahamayso tarjumaanka. Haddii aadan fahmin turjumaanka, waa inaad u sheegtaa Xubinta Maxkamadda iyo/ama shaqaalahaaga bulsheed isla markaaba. Xusuusnow taasi **kuma** yeelanayso saamayn xun codsigaaga magangalyada oo wuxuu macnaheedu noqoon karaa kaliya in dhagaysiga IPAT loo beddelay maalin kale iyadoo oo laguu diyaariyo turjumaan aad fahamto.



## SHAQAALE BULSHEEDKA & LOOYARKA

Shaqaalahaaga bulsheed iyo looyarkaaga ayaa kuu raaci doona dhagaysiga racfaanka. Waxay halkaas kuugu joogaan ku taageero, laakiin waxa lagaa rabaa inaad ugu jawaabto su'aalaha adiga oo isticmaala ereyadaada. Mararka qaarkood ayuu Xubinta Maxkamaddu weyddiin doona looyarkaaga iyo shaqaalahaaga bulsheed inay adiga kuu hadlaan arrimaha qaarkood ee la xiriira codsigaaga magangalyada. Looyarkaaga ayaa doodo sharciyeed samayn doona oo difaacaya sababta aad ugu baahan tahay magangalyada.



## SARKAALKA IPO EE ARRIMAHA DHIIBAYA

Sarkaal ka socda xafiiska IPO ayaa walibana joogi doona dhagaysiga. Dhageysiga maxkamadda IPAT, Xubinta Maxkamadda ayaa dhici karta inuu weyddiiyo sarkaalkan su'aalo ku saabsan go'aanka IPO.

## MARKHAATI

Mararka qaarkood markhaatiyo ayaa ka qaybgali kara dhegaysiga maxkamadda IPAT. Markhaatiga ayaa u sheega Xubinta Maxkamadda macluumaadka ku lug codsigaaga magangelyada, sida haddii u isagu ama iyadu ay arkeen inuu wax kugu dhacay adiga iyo/ama qoyskaaga muddo la soo dhaafay. Looyarkaaga ayaa kaala hadli doona arrintan haddii ay khuseyso codsigaaga magangalya.

Haddii u Xubinta Maxkamaddu uu u maleeyo inay xaafiiska IPO ay gaareen go’aan qalddan, waxay gaari doonaan go’aan cusub. Kaddibna wasiirka caddaaladda iyo sinnaanta ayaa kuu soo saari doona caddayn midkoodna ha noqdaane aqoonsi heer qaxootinimo ama badbaadin hoosaad, taas oo ku xiran wuxuu go’aamiyo Xubinta Maxkamaddu.



**Maxkamadda IPAT ayaa leh tilmaamo gaar ah oo loogu talagalay dhageysiga rafcaannada loogu talagalay carruurta iyo da’yarta. Si aad u hesho maluumaad intaa ka badan fiiri Tilmaamha Maxkamadda ee Badbaadinta Caalamiga (International Protection Appeals Tribunal Guidelines) No. 2017/5 Appeals from Child Applicants (Rafcaannada Codsiyada ka yimaad Carruurta).**



Haddii rafcaankaaga aad u qaadatay maxkamadda IPAT uusan guulaysan, oo aanay horay kuu siinin heer badbaadin hoosaad ah ama u oggolaan inaad dalka joogto xafiiska IPO, waxaad haysan doontaa **5 maalmood** inaad siiso macluumaad cusub Wasiirka Cadaaladda iyo Sinnaanta.

**Macluumaadkani wuxuu sharraxi doonaa sababta ay tahay in lagu siiyo oggalaansho joogitaan. Waa muhiim ah in adiga, shaqaalahaaga bulsheed iyo/ama looyarkaagu aad bixisaan macluumaadkaas sida ugu dhakhsaha badan. Wasiirka caddaaladda iyo sinnaanta ayaa dib u eegi doona go'aankii ugu horreeyay ee ahaa inaan lagu siin oggolaanshaha joogitaanka. Haddii laguu diido oggolaansho joogitaanka, looyarkaaga iyo shaqaalahaaga bulsheed ayaa ka wada hadli doona dhammaan waxyaabha kula gudboon ee ah aad heli kartid inaad ku kacdo, oo ay ka mid yihiin ku biiridda qoyskaaga dalkaagii hooyo haddii ay taasi tahay dantaada ugu fiican.**



# 8.

# Macluumaad kale

# Waa maxay habsocodka qiimaynta da'da?

Mararka qaarkood haddii u sarkaalka IPO ama u shaqaale-bulsheedka Tusla uu shaki ka qabo da'daada waxa dhici in inay amraan in lagaa qaado qiimaynta da'da. Tan waxa ka mid noqon kara waraysi gaar ah oo lala yeesho xafiiska IPO iyo/ama Tusla. Haddii aad haysato mid kasta ha noqdeene dukumeenti aqoonsi, shahaadada dhalashada ama macluumaad kale oo muujinaya da'daada markaa la wadaag shaqaale bulsheedkaaga iyo sarkaalka IPO. Haddii u xaafiiska IPO go'aamiyo inaad ka wayn tahay da'da 18 markay tahay ujeeddooyinka codsigaaga magangalyada markaa waxa arrintaada lagu soo baari doonaa ahaan qof qaangaar ah markay atahay habsocodka magangalyada. Taas macnaheeduna waliba waa inaad ka guurto hoygaaga hadda oo aad u guurto hoy nooc kale ah oo loo yaqaan xarunta siinta tooska ah.

# Waa maxay Shuruucda EU ee Dublin?

Shuruucda Midowga Yurub (EU) ee Dublin ayaa ah heshiis ka dhexeeya dalalka ku jira Midowga Yurub. Waxay dejisaa xeerarka lagu raacayo go'aaminta dalka EU-da ay tahay inuu baaro arrinta codsigaaga magangalyada. Sababta loogu yaqaan Shuruucda Midowga Yurub ee Dublin waa iyada oo lagu saxiixay Dublin gudaheeda.

Hooyada, aabbaha, walaashaa, walaalkaa, eeddadaa (habaryartaa) ama adeerkaa (abtigaa) ma ku nool yihiin waddan kale oo ka tirsan Midowga Yurub (EU)? Ma rabtaa inaad ku biirto iyaga? Fadlan u sheeg looyarkaaga iyo shaqaalahaaga bulsheed wixii ku saabsan xubnaha qoyskaaga ee jooga dalalka kale ee Midowga Yurub sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Xafiiska IPO ayaa laga yaabaa markaas inuu weyddiisto dalka kale ee ka tirsan Midowga Yurub inuu baaro codsigaaga magangalyada si aad u tagto oo aad uguna biirto qoyskaaga.

Looyarkaaga ayaa awooda inuu ku siiyo macluumaad arrinta intaa u dheer haddii Sharciga Dublin u ku khuseeyo keeskaaga.

# Maxay tahay kala horreysiinu?

Waxa laga yaabaa inaad maqashay shaqaalahaaga bulsheed ama looyarkaaga oo hadlaya kala horreysiinta codsigaaga. Taas macnaheedu waa in, haddii codsigaagu uu u dhexeeyo qaybaha qaarkood, markaa waxa laga yaabaa in laga 'horreysiiyo' oo waraysigaaga ayaa loo qabanqaabin doonaa sida ugu dhakhsaha badan. Sababaha loogu kala horraysiinyo wax ka mid ah: haddii aad tahay ilmo aan lala socon, iyo haddii aad qabto xaalado caafimaad oo daran, ama haddii aad ka mid tahay dalalkan midkood: Suuriya, Eritriya, Ciraaq, Afqaanistaan, Iraan, Liibiya ama Soomaaliya.

# Anigu ma shaqayn karaa goorta codsigayga magangalyada la nidaaminayo?

Haddii aadan ku helin go'aanka xafiiska IPO illaa 9 bilood gudahood markaad soo gudbiso codsigaaga magangalyada waxa laga yaabaa in laguu oggolaado inaad u shaqeysato si la mid ah da'yart Ireland. Waxaa jira xeerar gaar ah oo loogu talagalay shaqaalaynta da'yarta Ireland, tusaale ahaan, carruurta da'doodu ka yar tahay 16 sano laguma shaqaalayn karo shaqooyinka waqti buuxa ah laakiin waxay qaban karaan shaqooyin inta lagu jiro fasaxyada xagaaga. Shaqaalahaaga bulsheed ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda aad u leedahay shaqaynta.



**Waxaad intaa in ka badan aad ka akhriyi kartaa Sharciga Dublin ee EU ee ku yaala Buugyaraha IPO ee Carruurta weyddiisanaya Badbaadinta Caalamiga ah ee loogu talagaly Carruurta Ku Jirta Habsocodyada Dublin.**

**Waxaad kin intaa ka badan oo ku saabsan ujeeddada kala horreysiinta xafiiska IPO Kala Horreysiinta Codsiyada loogu talagalay badbaadinta Caalamiga he ee Hoos Yimaad Xeerka 2015 ee Badbaadinta Caalamiga Ah.**



# 9.

# Xuquuqdaada

# Xuquuqdaada haddii lagu siiyey aqoonsi heer qaxootinimo ama badbaado hoosaad

Haddii lagu siiyey aqoonsi heer qaxootinimo ama badbaadin hoosaad waxaad leedahay xuquuqda qaarkood ee ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

- **U oggolaansho ku noolaan Ireland ugu yaraan 3 sano ah.**
- **Waxa laguu oggolaan doonaa inaad u shaqaysid sida da'yarta Ireland oo kale, haddii aad doonto.**
- **Waxaad ka dhigan kartaa waxbarashada dugsiyada hoose iyo sare iyo tababbarka la midka ah kuwa dadka da'yarta Ireland ah ay heelaan oo waxa laga yaabaa inaad uqalanto khidmadaha bilaashka ah ee lagu dhigto waxbarashada heerka saddexaad kaddib seddex sano oo tababbar ku jiritaan.**
- **Waxaad heli kartaa dheefaha samafalka bulshada iyo daryeelka caafimaadka ee la midka ah ka la siiyo dadka da'yarta ah ee reer Ireland.**
- **Waxaad u safri kartaa dalka dibaddiisa sida dadka Irish-ka oo kale, laakiin waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad u qaadato fiisa inaad tagto waddan kale iyo/ama aad u baahan tahay inaad coddsato dukumeentiga safarka (sida baasaboorka oo kale ah). Waxaa jira xeerar kala duwan oo u dhigan dukumeentiga safarka haddii aad haysato aqoonsi heer qaxootinimo ama badbaadin hoosaad markaa haddaba la hadal shaqaalahaaga bulsheed.**
- **Waxaad ka codsan kartaa Wasiirka Caddaaladda iyo Sinnaanta u oggolaanshaha xubnaha qoyskaaga ee kuugu dhow inay yimaaddaan Ireland oo ay kula noolaadaan; oo taana waxa loo yaqaannaa dib iskugu keenidda qoyska. Codsiga isu keenidda qoyska waa in lagu sameeyaa 12 bilood gudahood laga soo bilaabo markii qofka la siiyay aqoonsiga heerka qaxootinimada ama badbaadin hoosaadka.**
- **Waxaad codsan kartaa inaad noqoto muwaaddin Ireland 3 sano kaddib haddii aad haysato aqoonsi heer qaxootinimo. Haddii laguu siiyo aqoonsi heer badbaadin hoosaad ah waxaad codsan kartaa inaad noqoto muwaaddin Ireland 5 sano kaddib.**

# Waa kuwee xubnaha qoyskee aad u codsan karto iyada oo qayb ka mid ah codsiga isku keenista qoyska?

Marka lagu siiyo aqoonsiga heerka qaxootinimo ama badbaadin hoosaad, iyo illaa aad aad tahay qof da'yar oo aan la socon oo ka yar da'da 18, waxaad codsan kartaa xubnaha qoyska ee soo socda inay yimaaddaan oo kugula noolaadaan Ireland.

- **Waalidiintaada**
- **Walaalkaa iyo walaashaa, haddii ay yihiin kuwo ka yar da'da 18 oo aan reer lahayn**

Sida ku cad Sharciga Badbaadinta Caalamiga, Wasiirka Caddaaladda iyo Sinnaanta ayaa diidi kara codsiyadan markay yihiin duruufo xaddidan kaliya. Guud ahaan marka la eego, waxa laga yaabaa inaad awood u lahaan karto inaad xerayso codsi ah isku keenidda qoyska haddii aad 18 jirsatay, ama aad codsato u ehelka kale inay kugu soo biiraan laakiin taasi waxay ku xirnaan doontaa duruufahaaga. Shaqaalahaaga bulsheed ayaa kaala hadli doona arrintan waxa ku saabsan oo kaa caawin doona inaad codsato isku keenidda qoyska.

## *Muhiim*

Waa inaad ku codsataa isukeenidda qoyska ee hoos timaadda Sharciga Badbaadinta Caalamiga ah **12 bilood gudahood** laga soo bilaabo markii lagu siiyay aqoonsiga heerka qaxootinimo ama badbaadinta hoosaad. Xasuusnow inaad weyddiisato shaqaalahaaga bulsheed inuu kaa caawiyo diyaarinta codsiga iskukeenista qoyska.

# Xuquuqdaada haddii laguu oggolaado inaad joogto

U oggolaanshaha joogitaanka macnaheedu waa inaad joogi karto Ireland muddo wakhti ah iyada oo ku xiran xaaladaha qaarkood. Oggolaanshahan aya u badan tahay in laguu dheereeyo muddadaas dhammaadkeeda haddii u Wasiirka Caddaaladda iyo Sinnaantu uu ku qancay yahay in shuruudaha aan la jebin. Waxaad codsan kartaa inaad noqoto muwaaddin Ireland markaad ku noolaato Ireland muddo 5 sano ah.



"Aad ayaan u faraxay markii la isiiyay aqoonsiga heerka qaxootinimada. Hadda ayaan u qorshaysan karaa mustaqbalkayga gudaha Ireland."

Waxaad ka ogaan kartaa waxyaabo badan oo ku saabsan xuquuqdaada mid kasta oo ah **Xafiiska Macluumaadka Muwaadiniinta.**

# 10.

# Macluumaadka ururrada aad ula xiriiri kartid caawimada

## Team for Separated Children Seeking Asylum (Kooxda Loogu talagalay carruurta Luntay ee Raadinaysa Magangalyada), Tusla - Hay'ad Ilmo iyo Qoys

waxa lagala xiriiri karaa Sir Patrick Dun's Hospital, Lower Grand Canal Street, Dublin 2 D02 P667 or by calling 01 647 7000. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo:
**www.tusla.ie/services/alternative-care/separated-children/**

## The Legal Aid Board (LAB), Qaybta Carruura Soo Luntay (Adeegga Sharciga Qaxootiga)

waxay siiiyaan talo sharci dadka magangalyo doonka ah, oo ay ku jiraan da'yarta ku jirta habraaca nmagangalyada. Xafiiska saldhiggooda ugu wayn ah ayaa ku yaal 48-49 North Brunswick Street, Georges Lane, Smithfield, Dublin 7, D07 PE0C. Waxad la xariiri kartaa adiga oo waca **1800 23 83 43** ama iimayl u dira **smithfieldlawcentre@legalaidboard.ie**. Akhbaar intaa u dheer oo ku saabsan LAB iyo sida loo codsado gargaarka waxaad ka akhrisan kartaa: **www.legalaidboard.ie**

## Ombudsman for Children (Xafiiska Ergeyga Carruurta)

waa xafiis soo baara cabashooyinka ay keenaan carruurta iyo da'yarta ee ku saabsan falalka ururrada dadwaynuhu. Waxay ku yaalliin Millennium House, 52-56 Great Strand Street, Dublin 1. Waxaad kula xiriiri kartaa iyaga adiga oo waca: **1800 202040** ama **01 865 6800** ama adiga oo iimayl u dira: **oco@oco.ie**. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: **www.oco.ie**

## The Irish Red Cross Restoring Family Links Service

ayaa laga yaabaa inay ku caawiyaan haddii aad leedahay xubin qoys oo kaaga maqan meel ka baxsan Ireland. Waxaad kula xiriiri kartaa iyaga adiga oo waca: **01 642 4600** ama adiga oo u dira iimayl: **restoringfamilylinks@redcross.ie**. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: **www.redcross.ie/programmes-and-services-in-ireland/find-missing-family/**

## The Children's Rights Alliance

waxay leedahay khadka caawinta loogu talagalay carruurta, da'yarta iyo qoysaskooda ama dadka la shaqeeya si ay marin ugu helaan macluumaadka sharciga. Waxaad kula xiriiri kartaa iyaga adiga oo waca: **01 9020494** ama adiga oo iimayl u dira: **query@childrensrights.ie**. Waxa kale oo suurtagal ah in loo qabsato ballan rugahooda kala la-talinta sharciga. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: **www.childrensrights.ie/content/childrens-access-justice**

## The Irish Society for the Prevention of Cruelty to Children (ISPCC)

ayaa ah hay'ad samafal ah oo badbaadisa carruurta. Xafiiska saldhiggooda ugu wayn ah ayaa ku yaal 29 Lower Baggot Street, Dublin 2. Waxay bixiyaan adeeg 24 saacadood ah oo dhagaysasho qaranka oo idil ah looguna talagalay carruurta oo loo yaqaan ChildLine. Waa qarsoodi, asturnaa leh oo aan wax ka sheeg lahayn. Waxa lagala xiriiri karaa lacag la'aan meel kasta oo aad ka la joogo ireland lacag la'aan telefoonkan **1800 66 66 66**. Waxa kale oo aad booqan doontaa bartooda internetka ee ku taal: **www.ispcc.ie**

## Barnardos

waa hay'ad samafalka carruurta oo u ololaysa xuquuqda carruurta iyo qoysaska. Xafiiska saldhiggooda ugu wayn ah ayaa ku yaal Christchurch Square, Dublin 8. Waxaad kula xiriiri kartaa iyaga adiga oo waca: **1850 222 300** or **01 453 0355** ama adiga oo iimayl u dira: **info@barnardos.ie**. Wax kale oo aad waliba ka booqan kartaa bartooda internetka ee ku taal: **www.barnardos.ie**

## Empowering People in Care (EPIC)

ayaa u doodda xuquuqda dhalinyarada daryeelka ku jirta iyo oo walibana waxay la shaqaysa dhalinyarada u diyaargaroobaya inay ka baxaan daryeelka iyo oo ay galaan daryeelka waxa ka dambeeya. Waxaad la xiriiri kartaa xafiiska EPIC Dublin adiga oo waca: **01 872 7661**. Xafiiska saldhiggooda ugu wayn ah ayaa ku yaal 7 Red Cow Lane, Smithfield, Dublin 7. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: **www.epiconline.ie**

## SPUNOUT.ie

waa bogga internetka ee macluumaadka dhalinta Ireland oo ay abuureen dhallinyaro, looguna talagalay dhallinyarada. Barta internet ayaa bixisa macluumaad ku saabsan mawduucyo kala duwan oo ay ka jiraan waxbarashada, shaqada iyo caafimaadka. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: **www.spunout.ie**

## BeLonG To Youth Services

waa hay'ad qaran oo taageerta dhalinta ah lesbiyaanka, geyga, baysekjualka, taranjandharka, iyo intersekiska (LGBTI+) ee jooga Ireland. Waxay bixiyaan macluumaad iyo taageero aan wax ka sheeg lahayn oo asturan. Waxa kale oo ay maamulaan kooxaha dhalinyarada. Xafiiskoodu wuxuu ku yaal Parliament House, 13 Parliament Street, Dublin 2, D02 P658. Waxaad kula xiriiri kartaa iyaga adiga oo waca: **01 670 6223** am adiga oo iimayl u dira: **info@belongto.org**. Waxaad ka akhrisan kartaa akhbaar macluumaad ku saabsan BeLonG TO halkan **www.belongto.org**

## The Irish Refugee Council

waxay leedahay Xarun Sharci oo Madax-bannaan (Independent Law Centre) iyo Adeeg La Iska Iman Karo Bilaa Ballan (Drop-in Service) oo laga yaabo inay awood u yeeshaan inay ka jawaabaan su'aalaha kalida ah oo ayna bixiyaan macluumaad. Waxa kale oo ay kala shaqeeyaan da'yarta habsocodka magangalyada. Waxay ku yaalliin 37 Killarney Street, Mountjoy, Dublin 1 oo waxa lala xiriiri kara iyada oo la waco **01 764 5854**. Barta internetka The Irish Refugee Council ayaa ah: **www.irishrefugeecouncil.ie**

## NASC Ireland

waa adeeg la iska yimaad oo ka bixiya adeeg sharci iyo macluumaad bilaash ah arrimo kala duwan oo ku saabsan socdaalka iyo arrimaha la xiriira magangalyada. Waxay ku yaalliin 34 Paul Street, Cork, T12 W14H oo waxa lala xiriiri kara iyada oo la waco **021 427 3594**. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah fiiri: **www.nascireland.org**

## Doras Luimni

waxay bixisaa talo iyo macluumaad sharci oo ku saabsan arrimo kala duwan oo socdaalka ku-saabsan. Waxay ku taal Central Buildings, 51a O'Connell Street, Limerick. Waxaad kula xiriiri kartaa iyaga adiga oo waca: **061 310 328**. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: **www.dorasluimni.org**

## Crosscare

waxay bixisaa macluumaad iyo talo ku saabsan guriyaynta, samafalka bulsheed, waxbarashada, isukeenidda qoyska iyo arrimaha kale ee socdaalka ku saabsan. Waxay ku leeyihiin adeeg la iska yimaad oo loogu talagaly qaxootiga cinwaankan 1 Cathedral Street, Dublin 1. Waxaad kula xiriiri kartaa iyaga adiga oo waca: **01 873 2844** ama adiga oo iimayl u dira: **crs@crosscare.ie**. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: **www.crosscare.ie/refugee-service**

## JRS (Jesuit Refugee Service)

Ireland ayaa bixisa caawimo dadka raadinaya gacan u fidinta tooska ah ee magangalyada, fasallo luqadeed iyo taageero bulsho-niyadeed ah. Xafiiska saldhiggooda ugu wayn ah ayaa ku yaal 54-72 Gardiner Street Upper Dublin 1 D01 TX23. Waxaad kula xiriiri kartaa iyaga adiga oo waca: **01 814 8644** ama adiga oo buuxiya foomka la soo xiriirka ee ku yaal bartooda internet: **www.jrs.ie/index.php/contact**. Waxaad ka akhrisan kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan JRS Ireland halkan: **www.jrs.ie**

## SPIRASI

waxay caawisaa dadka ka samatabaxay jirdilka oo waxay u bixisaa fasallo lacag la'aan ah oo ku saabsan mawduucyada kala duwan ee ah Ingiriisiga, Xirfadaha Kombuyuutarka iyo Farshaxanka. Waxay ku yaalliin 213 North Circular Road, Phibsborough, waxaana lagala xiriiri karaa telefoonka **01 838 9664**.
Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: **www.spirasi.ie**

# Tilmaamahan waxa soo saartay Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga u Qaabbilsan (UNHCR) xafiiska Ireland.

**UNHCR waxay la shaqaysaa dawladaha, NGO-yada iyo shuraako kale si loo badbaadiyo qaxootiga, magangalyo doonka iyo dadyowga aan dowladda lahayn. Waxaad booqan kartaa bartayada internetka: www.unhcr.org/en-ie**

**Haddii aad rabto inaad la soo xiriirto xafiiskayaga, waxad noogu soo diri kartaa iimayl ireduprt@unhcr.org, ama waxaad naga soo wici kartaa 01 631 4510. Xafiiskayagu wuxuu ku yaal 102 Pembroke Road, Ballsbridge, Dublin 4.**

UNHCR
The UN Refugee Agency

102 Pembroke Road,
Ballsbridge, Dublin 4, Ireland

**Tel. +353 (0)1 631 4510**
**ireduprt@unhcr.org**
**www.unhcr.org**